

## **Xeerka lamba 110 ee 16 Nofember 1956 rep**

### **Dhismaha Guddiga Iskudhafka ah ee Horumarinta Dhaqaalaha (CISE)**

#### **MAAMULAHA**

Kadib marki la arkay sharciga Jamhuuridda Talyaaniga lamb 1301 ee 4 Nofember 1951 oo ansixieyey fulinta Heshiiska Maamulida Dhulka Somalia iyo amarradii isku xig-xigay;

Kadib markii la arkay sharciga lamba. 1 ee 7 Maayo 1956 oo khuseeyey dhismaha Dowladda Somaliyeed;

Kadib markii la arkay dekreetada lamba. 78 ee 18 Maayo 1956 oo ansixiey xeer nidaamiyaha Dowladda Somaliyeed;

Kadib markii la arkay dekreetada lamba. 108 ee 16 Nofember 1955 oo lagu dhisay Xafiiska Qorsheynta;

Kadib la arkay qod. 109 ee dekreetada lamba. 16 Nofemeber oo lagu dhisay Hey'adda Horumarinta Dhaqaalaha ee Somaliya;

Kadib markii la garoowsaday baahidda in la abuurro hey'ad baarta, isku duba ridda oo oggolato qorshaha iyo mashaaricda guud iyo kuwa gaarka iyo fulinta howlaha la xiriira horumarinta dhaqaalaha ee Dalka.

Kadib markii la dhegeystay Golaha Wasiiradaha;

#### **WAXAA LA AMRAY**

##### **Qod. 1**

Waxaa la dhisay Guddiga Iskudhafka ah ee Horumarinta Dhaqaalaha (CISE) oo u xilsaaran in uu baaro, isku dubariddo aqbalana qorshooyinka iyo mashaaricda guud iyo kuwa gaarka ee la xiriira horumarinta dhaqaalaha ee dalka.

##### **Qod. 2**

Guddigu wuxuu ka kooban yahay Rai'sul Wasaaraha iyo Wasiiro kale, Madaxa Xafiiska Qorsheynta iyo Guddomiyaha Hey'adda Horumarinta Dhaqaalaha ee Somalia.

Sarkaal ka tirsan Xafiiska Qorsheynta oo uu magacaabo Madaxa Xafiiska Qorsheynta ayaa fulin doono howlaha xoghayenimada.

##### **Qod. 3**

Qorshooyinka iyo mashaaricda ay CISE diyaariso waxaa loo gudbin doona hey'adaha maalgelin doono si loo gaaro qaabka lagu fulin lahaa.

##### **Qod. 4**

Dekreetadani waxay hirgeli doonta 11 Janaayo ee 1957.

Muqdisho, 16 Nofember 1956.

**Anzilotti**

Waxaa la arkay lamba. 674 ee 19 Nofember 1956

Madaxa Xisabaadka: **Tura**

Waxaa la arkay oo la diiwan geliyey lamba. 90 bogga lamba. 116

Muqdisho, 19 Nofember 1956.

Xisabaayaha Guud: **Spadaro**